Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Hadal-qoraaalka kalfadhiga 4aad
Documentiga Kulankii 25aad

Taariikh: 10/05/2014

Kalfadhga 4aad
Kulankiisii 25aad
Saacada la furay: 11:00 am
Saacada la xiray: 1:45 pm
Guntanka: 170

Ajendaha

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Hadal-jeedinta Guddoomiyha oo la xiriirta xildhibaanada Baarlamaanka**
4. **Sii Wadidda dooda hishiiska Shirkadda Fafouri.**

Shir-guddoonka Guddoomiyaha Baarlamaaka JFS, Mudane Muxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari)

Waxaa shirka furay Guddoomiyaha Baarlamaanka, Mudane Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari. Waxaana lagu furay Aayadaha Qur'aanka Kariimka uuna akhriyay Xildhibaan Sheikh Shaacir. Kadib, wuxuu sheegay in Golaha ay yaallaan howlo badan ayna muhiim tahay in arimaha la dhameystiro. wuxuun kaloo intaa ku daray in ay jirto soo xaadirid la'aan, wuxuuna habdhoorayaasha faray in ay soo qoraan Xildhibaankii 3 maalmood gudahooda maqnaada cudur-daar la'aan, sida uu qabo Qod.16aad ee Xeer-hoosaadka in laraaco warqad digniin ah haddii uu imaanwaayo in laga jaro 5 bilood gunadiisa. Tan kale, Xildhibaanadii dalka ka maqnaa ay ku yimaadaan khamiista Bisha ay tahay 15/5/2014. waxaana dhici karta in guddiyada qaar is dooran waayaan oo ay maqan xubnaha Guddiga, wuxuuna u yeeray C/llaahi Jaamac si uu akhriyo warbixintii Fafouri.

Xildhibaan Cabdilaahi Jaamac Wuxuu akhriyay hishiiskii Fafouri, wuxuuna sheegay in Fafouri hishiiskii ay gashay uusan isku dheeli tirneyn Qod. 8-aad shirkadda fafouri aysan jibin Recorka**.**

Xildhibaan Cusmaan Aadan Dhuubow (point of Arder) in xubnaha Guddiga qaar horey u maqnaa, Guddoomiyaha Baarlamaanka wuxuu sheegay mar haddey saxiixeyn Guddiga inta ugu badan sidaa ansax ku yahay waxa ay soo gudbiyeen.

Xildhibaan Maxamed Cumar Dhalxa (point of arder) wuxuu sheegay in Guddiga Arimaha Dibadda ay xaq u leeyihiin in ay wax ka ogaadaan in ay wixii hishiisyo ay Xukuuumadda la gashay shariikadaha iyo Xukuumadaha Gudaha iyo Dibadda.

XildhibaanAweys C/llaahi wuxuu sheegay in Guddiyada lafdhabar u yihiin Baarlamaanka lana doonaayo in ay isla wada shaqeeyaan Xukuumaddana, Xukuumaddana wixii hishiisyo ah ay gashayna dhamaan ay soo gudbisho Guddiga. Wasaaradda Arimaha Dibadda, Guddoomiyaha wuxuu sheega in Xukuumadda ay warqadaas u soo gudbisay Baarlamaanka si uu u keydiyo.

Xildhibaan Siidow aadan abaadir Wuxuu sheegay in uu yahay xoghaya Guddiga Gaadiidka waxayna ahayd in laga dodo, Guddoomiyaha guddiga Gaadiidka wuxuu sheegay in uu u gudbiyay Guddiga joogtada ah, wuxuuna sheegay in ay tahay wixii lasoo gudbiyay xaaraan wuxuuna soo jeediyay in lagu caliyo wasaaradda Gaadiidka.

Xildhibaan Maxamed Isaaq Faarax Wuxuu sheegay hishiiskii Fafouri inay kazoo wareegatay 9 bilood wuxuu golaha weydiiyay in shirkadda Fafouri lala galikaro mudo15 sano ah wuxuuna codsaday in Xukuumadda laweydiiyo shirkadda Fafouri.

Xildhibaan Maxamuud Sey Sey wuxuu sheegay in uu aad ugu mahad celinaayo Guddiga Maaliyadda, wuxuuna soo jeediyey in Baarlamaanka dodo kadibna loo celiyo heshiiskaan.

Xildhibaan Maxamed Amiin Xassan wuxuu sheegay in dib loo celiyo si ay wax uga soo bedelaan tankale, wuxuu soo jeediyey in ay xiriir wanaag yeeshaan

Guddiga dhexdooda iyo in ay helaan nuqul kamid ah Heshiisyada ay soo gudbiyeen Xukuumadda.

Xildhibaan Cabdi Dhuxuloow wuxuu sheegay in laga fiirsado inta aan lahowl galinin Shirkadda Fvori, wuxuuna soo jeediyey in Laanta Fulinta dib loogu celiyo Heshiiska Favori.

Xildhibaan Yaasiin Cabdi Salaan wuxuu sheegay in shirkada Favori ay dhaqaala doon tahay una qalmin Iasiiyo qandaraaskaan.

Guddoomiyaha wuxuu sheegay in ay qeexan tahay sharciga Maalgashiga shisheeye ee lambar 19 ee taariikhdiisu ahayd 19 May 1987.

Xildhibaan Axmed Ducaale wuxuu sheegay in uu khibrad u leeyaha garoonka, wax qalab ah ay keensatay majiraan, waxaa ka shaqeeya garoonka SKA.

Xildhibaan C/llaahi Muuse wuxuu soo jeediyey in shirkada Fvori lala xisaabtamo mudada 9ka bilood ay shaqeyneysay labadaas shirkadood maamul ahaan wey uga sii dareen garoonka, wuxuu soo jeediye in laceyriyo shirkadaan lana siiyo qandaraaskaan shirkado kale.

Xildhibaan Maxamed Cabdi Xasaan wuxuu sheegay in marka hore laqiimeeyo shirkada Favori, wuxuu sheegay in ay jiraan Shirkado kale oo Soomaalia ah oo shaqeyn kara loona dhiibo Airportka.

Xildhibaan Shuuriye Muumun wuxuu sheegay in shirkadda Favori sharci tahay in ay shaqeyso, nashqada ay sameyneyso waqtigee ku baxaayo.

XildhibaanCusmaan Aadan wuxuu sheegay in ay talao soo jeedinta ay ku qoran tahay bogga ugu dambeeyo, wuxuuna soojeediyey in cod lagaliyo.

Guddoomiyaha wuxuu sheegay in uu ku amaanayo Guddiga sida wanaagsan oo ay uga soo shaqeeyeen.

Xildhibaan Xiddig (Point of Order): wuxuu sheegay in Heshiis kasta oo dal shisheeye lala galaayo ay Ansixiyaan Golaha Baarlamaanka.

Guddoomiyaha wuxuu sheegay in beri loo codeyn doono heshiiska Favori, lagana doodi doono Xeer-Hoosaad. Kadibna maalinya Isniinta ayaa Guddiga Joogtada kahadli doonaan.

Shir-guddoonka, Guddoomiyaha Baarlamaanka, Mudane Maxaned Sheekh Cusmaan Jawaari, oo Shir-Guddoominayey kalfadhuga 4aad kulankiisa 24aad, wuxuu sheegay in Shirka xiran yahay saacadu markey ehayd 1:45 pm.